

# Kondhloom/Kondylom

Ma rabtaa xog ku qoran afaf kale? Booqo: [www.hivportalen.se](http://www.hivportalen.se)

Kondhloomka waxaa sababa fiiruska human papillomvirus oo loo soo gaabiyo HPV. Kondhloomka wuxuu leeyahay inta badan astaamo finan, waxaana leeyasugu gudbiyaa galmada aan ka hortag lahayn oo lala yeesho haween, ama leeyasaga galmoodo futada iyo afka. Fiirusku waxaa kale oo uu ku faafi karaa iyada oo laysu siiqeeyo iyo waxaa loo yaqaan petting kaas oo ah in jidhka lagu xoqo jidh kale. Dhibaatooyinku inta badan waa kuwo sahlan, laakiin finanka ayaa noqon kara kuwo la dhibsado.

## ASTAAMAHA LAGU GARTO KONDHILOOM

Khasab maaha inaad isku aragto astaamo si aad u ogaato in aad qaadday kondhloom. Haddii ay dhacdo in aad isku aragto astaamo waxaa ay qaadaneysaa dhowr toddobaad ilaa iyo ugu badnaan dhowr bilood inta ay ka soo baxayaan astaamo finan ah. Finanka inta badan waxaa ay ka soo baxaan xubnaha taranka hareerahooda iyo korkooda. Waxaa kale oo ay ka soo bixi karaan futada iyo afka dhuunta kaadi mareenka (ibta). Finanku inta badan waa kuwo wareegsan maqaarkana kor uga kacsan, ama waa finan meelo kala duwan ku rururay iyaga oo is haysta. Finanka waa la arki karaa inkasta oo mararka qaarkood adkaato in ay muuqdaan. Kondhloomku wuxuu kuu keeni karaa cuncun, maqaarka oo dildillaaca oo dhiiga iyo sidoo kale xanuun ku dhaca xubnaha taranka. Dumar ahaan waxaa dhici karta in aad dareento xanuun marka aad galmo sameeymeeyso. Kondhloomka waxaa si dhif ah looga heli karaa afka.

Mararka qaarkood waxaa dhici karta in kondhloomku oogada ku jiro bilo, ugu badnaan dhowr sannadood inta aannu dillaacin.

## ISKA BAADH KONDHILOOM

Ma jirto baadhis tusi karta in aad qabto kondhloom. Laakiin waxaad u tegi kartaa dhakhtar leh takhasus si uu kuu baadho haddii aad ka shakisan tahay in aad qabto kondhloom. Baadhistu ma ah bilaash.

## DAAWEEYN

Fiiruska HPV wuu iska bogsadaa, laakiin waqti dheer ayuu qaadan karaa. Xataa finanku iskood ayay u baabi'i karaan. Finanka waxaa lagu daaweyn karaa kareem (bomaato) ama dareere qaas ah oo lagu dhayo. Waxaa kale oo suurtoagal ah in finanka dab ama qaboojin lagu baabi'yo. Si lagu daaweyo waa in aad la xidhiidho dhakhtar iyada oo daaweyntu qaadanayso waqtiyo kala duwan oo ku xiran hadba nooca daaweynta ee la raacayo.

Haddii uu fiirus baaqi ku yahey xuubdheecaanka ama maqaarka, waxaa dhici karta in ay finanku dib u soo laab-

taan. Sidoo kale maadaama ay jiraan dhowr nooc oo fiiruska HPV ah, waxaa laga yaabaa in ay finanku dib u soo noqdaan haddii mar labaad lagu qaadsiiyo infekshanka. Sidaa daraadeed mar labaad ayaad u baahan tahay in lagu daaweyo. Daaweyntu ma aha bilaash.

## KA FIKIR HADDII AAD KONDHILOOM QAADDO

Kondhloomku wax raad ah kuma sameeyo in aad carruur yeelan karto iyo in kale, haddaad tahay dumar ama rag. Muddadda uurka waxaa dhici karta in finanku ku bataan hooyada uurka leh, waxayse inta badan baaba'aan marka ilmuhu dhashaan. Marka hooyadu ilmaha dhalayso, waxaa dhici karta in ay ilmaha qaadsiiyo kondhloomka.

Kondhomku waa ka hortag wanaagsan oo looga hortago in kondhloomka la sii faafiyo. Laakiin waxaa shardi ah in uu kondhomku daboolo meesha finanku ku yaallaan. Waa inaad u sheegto qofka aad isu galmooneeysaan haddii aad qabto kondhloom si aad wadajir uga taxadartaan.

Kondhloomka waxaa sababa dhowr nooc oo fiirus ah. Qaar ka mid ah fiirusyadan oo aan lahayn finan muuqda waxay keeni karaan isbedello ku dhaca unugyada xubnaha taranka haweenka iyada oon loo eegin dhinaca ay galmo ahaan u janjeedhaan. Isbedelka unugyada ku dhaca waxaa uu sababi karaa kansar (kaankaro) ku dhaca dhuunta ilmogaleenka. Sidaa daraadeed waxaa muhiim ah in dumarka lagu sameeyo baadhis xagga unugyada ilmogaleenka oo celcelis ah.

Waad iska tallaali kartaa fiiruska HPV noocyo ka mid ah. Waxaa fiican in tallaalka la qaato ka hor inta aanad sameeyn galmada kuugu horraysa. Tallaalkaasi waxaa uu kaa hor istaagayaa fiirusyada noocyadiisa caadiga ah, kuwaas oo sababi kara finan keeni kara kansar. Xataa haddii aad is tallaashay waxaa muhiim ah in aad sii waddo in unugyada la baadho.

---

Qoraalkan waxaa soo saaray heyadda sare ee maamulka bulshada (Socialstyrelsen) waxaana tifatirey HANS CARLBERG, oo ah dhakhtarka sare ee Sösam, waaxda caafimaadka galmada ee kiliiniga cudurrada maqaarka iyo cudurrada galmada ee cusbitaalka Södersjukhuset; HANS FREDLUND, caalin iyo dhakhtar kahortagga cudurrada faafa ee heeyadda caafimaadka gobolka Örebro, cusbitaalka jaamacadda ee Örebro; LENA MARIONS, caalin iyo dhakhtar sare ee kiliniga dumarka, cusbitaalka jaamacadda Karolinska.

---

Qaabka farshaxanka iyo sawirrada: Infab

